



Xaflad BBQ oo lagu taageerayo dadka deegaanka

Arbaco 26-ka bisha Ogosto, 10-ka subaxnimo ilaa 2-da duhurnimo
Xarunta Bulshada ee North Richmond
(North Richmond Community Hub)

- Caawimaad online ka ah oo aad ku codsan karto wixii laguu sameynayo
- Caawimaada myGov
- Caawimaad lagaa caawinayo biilashaada korontada
- Talooyin ku saabsan sidii aad gurigaaga ammaankiisa u xaqiijin lahayd
- Wax badan ka ogoow Mashruuca Dhismaha Guryaha ee (Big Housing Build)

La kulan Dhaval – Maamulahaaga cusub ee Xarumaha

Dhaval wuxuu aad u danaynayaa inuu isbeddel dhab ah u sameeyo dadka deegaanka inta uu ku guda jira doorkiisa cusub ee ah maamulaha xarumaha.

Shaqadiisa waxaa qeyb ka ah inuu gacan ka geysto maamulista howlaha dayactirka iyo qandaraaslayaasha goobta imaanaya waxaadna arki doontaa Dhaval oo maalin kasta xaafada ku dhex lugeynaya.

Wuxuu diirada saari doonaa hormarinta amniga iyo adeegyada xaafada Richmond, mashaariicda uu hadda hayo waxaa ka mid ah kordhinta baarkinada baabuurta la dhigto ee loogu talagalay dadka deegaanka iyo casriyeynta nalalka waddooyinka.

Dhaval wuxuu fahamsan yahay muhiimadda ay leedahay in guryaha iyo goobaha la wadaago si fiican loo maareeyo.



"Hadafkayga ugu weyn waa inaan abuuro jawi ay dadka deegaanku ku dareemaan ammaan, ixtiraam iyo inay ku faanaan meesha ay ku nool yihiin."
– Dhaval

Waxa kale oo uu aad ugu dadaali doonaa inuu xiriir fiican la yeesho bulshada.

Si aad u ogaato qaabka aad codsi dayactir ugu soo gudbin karto khadka internetka, booqo housing.vic.gov.au/online-services, ama wac **13 11 72**.

Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalogula wadaagay kulamadii wadatashiga




Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/richmond-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**

Somali | Soomaali



BIG HOUSING BUILD

Bilaha Luulyo/Ogosto 2026

Waqooyiga Richmond

Wixii ku soo kordhay Bulshada

Ra'yigaaga ku saabsan marxaladda xigta ee dib-u-dhiska North Richmond nala wadaag

Ra'yigaagu wuxuu naga caawin doonaa qaabeynta iyo qorsheynta xaafadaas ee mustaqbalka.



Waxaad ka qeybqaadan kartaa xog-ururinta adiga oo booqanaya bogga internet ka ee ah **engage.vic.gov.au/north-richmond-housing-precinct** ama waxaad iskaan-garayn kartaa QR koodhka.

Xog-ururintu waxay xirmaysaa Axadda 16-ka bisha Ogosto saacaddu marka ay tahay 11:59-ka habeenimo.

Ama, kaalay oo kula hadal kooxdeena mid ka mid ah kulamada/xafladaha aan qaban doono.

Kulammada bulshada ee la imaan karo adiga oo aan ballan hore usii qabsan:

The Learning Bank
124 Victoria St, Richmond

Sabtida 1-da bisha Ogosto, 11-ka subaxnimo ilaa 1-da duhurnimo
Khumiista 6-da bisha Agoosto, 5-ta galabnimo ilaa 7-da fiidnimo

Dhacdo bulsho oo si kedis ah u dhici karta

Talaado 28-ka bisha Luulyo o 11-ka subaxnimo ilaa 5:30-ka galabnimo

Wixii ka dhacaya Richmond

Bilaha Luulyo/Ogosto 2026

139 Highett Street

Waxaa la hubinayaa adeegyada dhulka

- Shaqo yar oo baaritaan ah ayaa socdabilaha Luulyo iyo Agoosto oo dhan.
- Lama filayo wax culeys ah

Howlaha shaqo

- Xoogaa yar oo muunado (samples) ah ayaa laga soo qaadi doonaa guryaha la faaruqiya gudahooda iyo sidoo kale darbiyada banaanka ah
- Albaabo amni ayaa lagu rakibi doonaa dabaq kasta ee la faaruqiya

106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street

Dib u dhiska mustaqbalka

Rakibaadda qaboojiyaha/mukeyfyada ayaa la wadaa

Meelo baskiilada la surto

- Meelo cusub oo baskiilada la suran karo ayaa waxaa lagu rakibay dhulka hoose ee dhisme kasta. La soco wixii macluumaad dheeraad ah ee soo kordha ee ku saabsan sida loo gali heli/geli karo.

Meelo ay ku lugeyn karaan dadka lugeynaya

- Shaqo lagu dayactirayo agagaarka 112 Elizabeth Street ayaa bilaaban doonta dhammaadka bisha Luulyo.
- Howlahaas shaqo waxaa qeyb ka ah ballaarinta iyo dayactirka waddooyinka si ay kuugu fududaato inaad ku dhex socoto.

Church Street, Elizabeth Street, Anderson iyo meesha kor loogu socdo ee Williams Court

Howlaha shaqo

Waxaad arki doontaa waxyaabo badan oomeesha ka socda maadaama aan u diyaargarooobi rabno inaan bilowno marxaladda xigta ee dib-u-dhiska iyadoona la dumin doono dhismayaasha la faaruqiya.

- Meelahaas waxaa lagu wareejiyay silig.
- Waxaa kaloo xiran Post Office Lane. Wadada Victoria Street waxaa laga soo geli karaa oo kaliya waddooyinka Lennox iyo Church streets.
- Meelo ay isticmaali doonaan shaqaalaha ayaa goobta laga hirgelin doonaa
- Waxaa laga yaabaa inaad mararka qaarkood aragto gaadiidka dhismaha iyo sidoo kale boodh, ama aad maqasho shanqadh ama aad dareento gariir.
- Mararka qaar waxaa laga yaabaa in la badelo meelaha ay dadka lugeynaya kasoo geli karaan Elizabeth Street, fadlan raac calaamadaha oo isticmaal meelaha loo iclaamiyay inay dadka lugeynaya wadada ka gooyaan
- Baarkinada baabuurta la dhigto ee ku taal Anderson iyo Williams Courts ayaa la xiray.

Taageerada loogu talagalay dadka guuraya ee degaya guryaha cusub

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha

Waqooyiga Richmond
Xarunta Bulshada
110 Elizabeth Street

Agagaarka xaafada

Amniga xaafadda oo dhan

- Dadka degan dhamaan dhismeyaal/waxaa loo sameyn doonaa fureyaal/kaarar lagu geli karo goobta. *Kala soco waraaqaha darbiyada lagu dhajiyay wixii macluumaad dheeraad ah*

Garoonka kubadda kolayga oo la casriyeynayo

- Howlaha shaqo ee dayactirka ayaa meel gebogebo ah maraya, waxaana la qorsheeynayaa in dib loo furo bilaha Ogosto/Sebtembar.



eeg gudaha guryaha cusub

5 Lewis Court iyo 161 Elizabeth Street

144 guryo bulsho/dowlad oo cusub iyo goobo bulsho

Ayaa la dhameystiray sanadkii 2025 - kireysteyaasha ayaa ku guuray



- Meelaha ay dadka lugeynaya wadada ka gooyaan oo ammaan ah
- Dadka lugeynaya meelo ay ku lugeyn karaan
- Dadka lugeynaya looma oggola inay maraan
- Baarkinada baabuurta la dhigto waa la xiray



Inaysan wax dhibaato ah kaa soo gaarin meelaha ay shaqadu ka socoto ee xaafadaada

Waxaan si joogto ah ula soconaa waxyaabaha ay ka mid yihiin shanqarta, boodhka iyo gariirka si wax kasta amaan u ahaadaan.

Ku wareega agagaaraha

- Marwalba inta aanan shaqada la bilaabin ka hor waxaa meesha lagu wareejin doonaa deyr
- Marwalba raac calaamadaha si aad wadooyinka goobta ugu dhex socoto
- Raac tilmaamaha shaqaalaha baabuurta haga markay halkaas ku sugan yihiin si ay kuu caawiyaan

Si nabdoon in loo maareeyo alaabaha

- Nidaam amni oo adag ayaa marwalba jiri doona marka meesha laga saarayo lana nadiifinayo waxyaabaha khatarta keeni kara
- Calaamado wax sharaxaya ayaa marwalba goobta la dhigi doona si aad uga fogaato meelaha ay yaalaan waxyaabaha khatarta leh.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto shaqaalo xiran dhar jirka difaacaya

In la helo meelo laga geli karo

- Meelo ay ka geli karaan adeegyada gurmada degdega ah ayaa marwalba jiri doona
- Baarkinada baabuurta la dhigto oo si ammaan ah loo geli karo, oo ay ku jiraan baarkinada la heli karo, ayaa ahaan doona wax helitaankooda lasii joogteynayo.

Shaqadeenna waxaa hagaya saacadaha caadiyan la shaqeeyo ee ay go'aamiyeen Golaha deegaanka:

Isniin ilaa Jimce	Maalmaha sabtida
inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo	9-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo

Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha golaha deegaanka (council permit) si loo shaqeeyo wixii ka baxsan saacadahaas balse waan lasoo socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Wixii shaqo ah oo dhan waxaa loo qabtaa si waafaqsan heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

Dadka deegaanka ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xiriiraan xafiiska guryaha ee deegaanka:

1300 598 521

richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au